# Halgankii SNM EE Dibada-

**Halyeeyo La Hilmaamey**
**"Mujaahid Maxamed Jamaac Nuur "Blaki"**
**BARIGA AFRIKA "EAST AFRICA"**

**By: Fuaad Sh. Abuubakar**
**MAREEGTA FARSHAXAN**

**Note:** Waxaa isaguna qoraalkan aan ku xusi doonaa- Mujaahid Idiris Xaaji Cismaan inkastoo ay Mareegta Farshaxan u suurtoobi weyday inay waraysato maadaama uu yahay shakhsi sida Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” lagu sunto halgankii dibada inuu culeys weyn ku lahaa, oo aanu markale taariikhdiisa u banbixi doono.

**Ged-gedoonka waayuhu wuu qiri, taariikhda guudi**
**Gurmadkii maatida u kacaye, gooyey taladeeda**
**Waa kuwii ka gam'in xilkoodi, gudashadiisiiye**
**Gal-dalool iyo quudhsi raggii, gardarada diidey**
**Gujo naasta raggii ka dhiidhiyey, gedo wanaagooda**
**Waa kuwii godkuun ku jiree, kaga gig siinaayey**
**Waa kuwii god iyo dhufays galee, guntad ku raameeystay**
**Waa kuwii gelin iyo habeen, cadowga goobaayey**
**Waa kuwii goor walba naftood, guuto lagu saaray**
**Gowraca raggii joojiyee, kaga gariirsiiyey**
**Guryaha ragga u iibiyee, gubayey laabtooda**
**Hooyooyinkii goblamayee, gabanadood waayey**
**Gawaadhida kuwii keenaye, goownaxyada buuray**
**Gaashaan qaadkii qurbahee, cadho galiilyooday**
**Godobtii darneyd kuwii qiraye, dibada gaadhsiiyey**
**Kuwii qalin muruq ku gooyee, cadowga giigiimay**
**Giiryaalle raggii eryadee, geedka sare fuushey**
**Geesiyadii geedka u galee, goobtan ka xoreeyay**
**Inaynu maanta guushood xusnaa, gaar bay noo tahaye.**

**Jamaal Cali Xuseen (Gabaygiisii Abaal Gud April2, 2009)**

April 4,2010
Mareegta Farshaxan

Dhib ,rafaad,naf hurid, daal ,iwm. ee loo soo maray gogosha xornimo ee bulshada Somaliland maanta ku dhacadiidayaan waxaa inta mudan u huray dad badan ,halka in badani maalintii SNM lagu dhawaaqay ay moodayeen guuldaro iyo gumaad bulshada Somaliland loo horseedayo. Indheergaradka sidaa si ka duwan arkayey waxaa ka mid ahaa dad badan oo dibadaha joogay arkay inay hawlgal u diyaar garoobaan inkastooy waxyaalo badan dabrayeeen . Hase yeeshee markay talo la wadaaageen naftoodii is tuseena in aanay haboonayn in laga hadho tareenkan shiraaqanaya horseedna u ah xornimo umadeed si kastooy ugu suurtogalaysay yeelay hurayna inta mudan eey awood u lahaayeen.

Halgankii hubeysnaa ee SNM muu aheeyn mid ku kooban qoriga caaradiisa ee wuxuu ahaa mid ka qoto dheer intaasi sida ka muuqataa tuducyada gabayga ah ee kor ku xusan. Halgankaasi waxa ka mid ahaa dad dibada ka taageerayey hadday noqoto inay qalin ku taageeraan iyo hadday noqoto qaar maaliyad iyo dhaqaale ku taageeraba. Haddaba tiirarkii waaweynaa ee SNM dhinaca dhaqaalahu kaga socday waxaa ugu waaweynaa dadkii ku noolaa waddamada carabta gaar ahaan waddanka Sacuudi Areebiya, iyo weliba Barigga Africa gaar ahaan waddanka Kenya.

Haddaba waddankaasi Kenya raggii tiirarka waaweeyn ka ahaa ee SNM la daba taagnaa dhaqaalaha joogtada ah, siyaasada iyo wixii la mid ahba kuwoodii ugu waaweeynaa waxaa ka mid ah;

**1. Maxamed Jaamac Nuur "Blaki",**
**2. Idiris Xaaji Cismaan.**

Labadaasi mujaahid waxay ka mid ahaayeen dadkii tirada badnaa ee asalkoodu uu ka soo jeeday Somaliland dhalasho ahaan, laakiin ku dhaqnaa awoow ilaa ka awoow Barriga Africa. Dadkaasi oo ka mid ahaa jaaliyadihii dibada ee udub dhexaadka u ahaa halgankii hubeysnaa ee SNM.

Labadaasi shakhsi waxay door lama ilaawaan ah ka soo qaateen sooyaalkii halgan ee SNM iyagoo xataa ay dhibaatooyin fara badani ka soo gaadheen oo ay ku kaliftay inay u iibiyaan guriyahoodii. Haddaba waxaa u suurto gashay **Mareegta Farshaxan** inay waraysi la yeelato Muj Maxamed Jaamac Nuur Blaki oo ay qormadan kaga waranto qoraal kooban oo ku saabsan taariikh nololeedkiisa. Iyadoo aanay suurto gelin in la waraysto Muj Idiris, haddana intii aanu ka maqalnay ayaanu in yar kaga odhan doonaa maqaalkan iyadoo mar danbe aanu ula kala gaala bixi doono taariikhdii halganka oo tafatiran.

**TAARIIKH KOOBAN: Muj Maxamed Jaamac Nuur "Blaki"**



Jaamac Nuur (IHUN) wuxuu ku barbaarey degaanka gobolka Togdheer ee wadanka Somaliland ,hase yeeshee socdaal uu ku tagay magaalada Cadan ee dalka Yemen ayaa suurtogaliyay inuu 1934[kii] ugu baqoolo dhinacaa magaalada Nayroobi ee dalka Kenya.
Gu'gii 1950[kii] Waxaa aabo Jaamac Nuur iyo hooyo Maryan Cilmi ugu dhashay magaalada Nayroobi ee dalka Kenya wiil ay ugu wanqaleen Maxamed. Waxaa la dhashay caruur dhawr ah kala ahna Faadumo,C/Rashiid,Aamina-Shaadi, Xasan, Axmed, Kinsi,Farxiya .Taasi waxay tiradooda ka dhigaysaa 4 rag ah iyo 4 dumar ah.Mujaahid Blaki wuxuu ku barbaaray magaalada Nairobi ee waddanka Kenya oo uu waxbarashadiisii hoose/dhexe ku qaatey dugsiga Tanzaniya Private School.Halka uu dugsiga sarena uu ku dhameeystay dugsiga sare ee Nairobi High.

Ka dib mujaahidku wuxuu u xoogsi tegay noqdayna shaqaale ka tirsan wasaarada dalxiiska (Ministry of Tourism), waxaanu isaga laftigiisu furtay shirkad gaar ah (private company)oo uu ka furay waddanka Kenya aanu isagu maalgaliyey. Iskufilnaanshaha dhaqaale ee Mujaahidku gaadhey wuxuu sababey inuu yeesho saaxiibo badan oo ka tirsan xukuumada Kenya, waxaase la yaab badneyd inuu yeesho taageerayaal badan oo aad ugu riyaaqsanaa heerka uu ka gaadhey tartankii baabuurta ee lagu qaban jiray geeska Afrika.Tani waxay aad ugu fududaysay inuu si hagar la'aaneed uga qayb qaatey halgankii xaq u dirirka aanu door laxaad leh ka ciyaaray halgankii hubeysnaa ee SNM kula jirtay teliskii Siyaad Barre.

Haddaba intaynaan u gelin taariikhda mujaahidka ee ku waajahan doorkii uu ka ciyaaray taakuuleyntaa halgankii SNM, waxay Mareegta Farshaxan jeceshahay inay sugto taariikh mujaahidku ku leeyahay tartan dadka madoobi ay ka madhnaayeen oo ah mid aad loogu faanno oo aanay dadka badankiisu ka war qabin.

**TAARIIKHDII MUJ. BLAKI EE TARTANKA BAABUURTA (Sports Rally)**



Muuqaalku dushu wuxuu inala wadaagayaa maalin mudan ka sheekayn,ididiilo badana galisay dadweynaha ku dhaqan qaarada Afrika gabi ahaan, gaar ahaana wadanka Kenya ka dib markay magacooga soo bandhigtay guusha uu soo hooyey Maxamed Jaamac Nuur "Blaki".Waxaa kaloo muuqaalku tusayaa xeer ilaaliyihii guud ee dalka Kenya Mr**.**Charles Mugane Njonjo oo gudoonsiinaya abaal marin Maxamed Jaamac Nuur oo ahaa hormoodkii guushaa lagu ladey,wadeyna gaadhiga sumada tirsiimadiisu aheyd Car No.41.

Gu'gii 1978$^{kii}$ ayaa tartan baabuureed **(**Professional Motor Sports Rally - East Africa) uu ka dhacey geeska Afrika.Tartarkaasi si gaar ah ayaa looga soo dhaweeyey dalka Kenya

ka dib markii uu  Maxamed Jaamac Nuur  guul u soo hooyey, noqdayna hormoodkii qaarada Afrika  ama qofkii ugu horeeyey ee ka mid ah dadka ku abtirsada midabka madow ee badiyey tartan noocan oo kale ah .Tartankani waxaa loogu magacdarey ama uu ku suntanaa 1978kii Harambee Rally. Tani waxay ku khasabtey   **Mr.**Charles Mugane Njonjo oo ahaa markaa  xeer Ilaaliyaha guud ee dalka  Kenya inuu go'aansado ka qaybgalka gudbinta abaalmarinta. Mr.Charles Njonjo isagoo ka hadlayey arintan ayaa wuxuu yidhi sida uu xusay wargeyska "The standard" ee soo baxey bishii April 27, 1978kii : "There was no reason why African drivers could not win  or complete the rally.All was required  was practice, knowledge of the standing regulations and determination". Wuxuu sugay in   tartanka la badin karo hase yeeshee loo baaahan yahay laylis, aqoon u yeelasho xeerarka iyo  dhabar adayg ay ku ladhan tahay goosasho. Waxaanu Mr.Charles Njonjo ugu deeqay  ka qaybgalayaashii tartankaa  lacag naqdi ah si loogu dhiirigaliyo  guul ka soo hoynta tartanka  dhacayey gu'gii 1979 ee ku sumadaysnaa 1979kii Safari Rally.

Safar Rally waxay dad badani u   caleemo saareen  inuu yahay tartanka ugu dhib iyo rafaad badan aduunka. Waxaa tartankan  dhidibada loo taagey  uguna horeysay in la qabto  intii u dhaxeysay bishii May 27 ilaa bishii Juun 1 ee gu'gii 1953kii  waxaana loogu magac darey  tartankaa "**East African Coronation Safari**". Tani waxaa lagu taageerayey caleemosaarkii iyo u dabaaldagii  boqoradii  Ingiriiska ee Queen Elizabeth II. Hase yeeshee gu'gii 1960kii ayaa  loo digorogay  inuu ku caanomaalo magaca  East African Safari Rally..


Sawir dhinacani hoose ku xardhani wuxuu muujinayaa  Mujaahid Blaki oo ku guuleystay tartankii orodka baabuurta ( Professional Motor Sports Rally - East Africa) ee Bariga Africa saddexdiisa waddan ee Kenya, Tanzania, iyo Uganda laysku soo mari jiray.




Tartankaasi oo goyn jiray masaafad ay baaxadeedu dhan tahay 6,500 km, waxaa berigii hore la odhan jiray "East Africa Safari". Mujaahid Maxamed Jaamac Nuur "Blaki" wuxuu tartankaasi nooca 1600 CC Class uu koobkeedii kaalinta koowaad ku galay 1978kii, 1979kii, iyo 1980kii. Mujaahidku wuxuu noqday ninkii ugu horeeyay ee Afrikaan madow ah oo dhameeya 6,500 KM markii ugu horeeysay 1978kii , halkaasina wuxuu ka sameeyay taariikh lama ilaawaan ah oo ilaa iminka lagaga xasuusto waddankaasi Kenya. Blaki xilliyadaasi wuxuu aad uga soo bixi jiray jaraa'idka waddankaasi. Muj Blaki wuxuu kaloo ka mid ahaa 5tii nin ee ugu horeeyay ee Afrikan ah ee kaba qayb gala tartan baabuureed 1971kii . Ka dib markii uu tartano yar yar koobab badan ka qaatay wuxuu mujaahidku markii ugu danbeeysay wacdaro lama ilaawaana ka

dhigay tartankii baabuurta ee saddexda waddan laysku soo marayey.

Haddaba waxay Mareegta Farshaxan arrinkaas ka waraysatay safiir Maxamed Nuur Indho-buur oo ah ninka u fadhiya Somaliland waddanka Kenya xilligaasina isagu joogay waddanka kenya, waxaanu yidhi Amb Indho-buur; " Waxaan xasuustaa anigoo yar in aanu waddada soo istaagi jirnay habeenkii oo dhan bal si aanu markhaati uga noqono Blaki oo baabuurkiisii wata, annagoo taageero ula diyaara, marka uu baabuurkiisu marana halkaasi farxad ayaanu la ooyi jirnay. Markaanu guryihii ku noqonana waxay islaamahu na weydiin jireen " Blaki ma maray waddada?", waxay ahayd xilli uu Blaki farxad gelin jiray Somali dhaafoo, nin madoow oo dhan".




Tartanka baabuurtu wuxuu ka mid ahaa shanta dunida ugu weyn oo ay weliba ka soo qayb geli jireen niman caana oo baabuurta ku tartami jirtay oo ka iman jiray Ameerika, Yurub, iyo Aasiya. Dadka wadda baabuurta 10ka ugu horeeya ku guuleysata waxaa maal gelin jiray shirkado waaweeyn oo caalami ah oo iyagu "factory sponsored cars" ayeey ahaayeen halka gaadhiga mujaahid Blaki uu isagu gurigiisa ku sameeysan jiray oo ay asxaabtiisu ka kalkaali jirtay xagga maaliyada.

Haddaba ka dib guulahaas laxaadka leh ee 1978 $^{kii}$, 1979 $^{kii}$, 1980 $^{kii}$, iyo inuu noqdo ninkii ugu horeeyay ee madow ee dhameeya tartankaasi ayaanu mujaahid Blaki wax ka weydiinay siduu u arko guushaas, waxaana uu mujaahidku yidhi; " Waxay ahayd imtixaan qofka bini’aadamka ah samirkiisa iyo inta ay birtu adkaysanaysaba lagu eegayay, wax ciyaara may aheyn 6,500KM iyo saddex waddan oo laysaga gooshayo. Ilaahay baa mahad leh inaan ku guuleysto, waxayna sharaf u ahayd dadkii oo dhan".

## Baadisooca Tilmaameed ee Mujaahidka:

Waxaa aad loogu tilmaamaa Mujaahid Blakie inuu yahay nin gacan furan aadna u deeqsi ah.Had iyo jeer waxaa lagu baadisoocaa inuu maal iyo muruqba u huro wuxuu aaminsan yahay una farobaxo.Waxaa maankiisa mari wayday sida xukkumadii Siyaad Bare ula dhaqmeysay goboladii woqooyi (iminkana ah wadanka Somaliland).Wuxuu markaa u hawlgalay siduu dhibta ula qaybsan lahaa qayb libaaxna ka qaadan lahaa halgankii xaq u dirirka ahaa ee SNM oo lagu dhawaaqey markii uu ka madax banaanaadey ka qayb qaadashadii tartanadii baabuurta .

Gu’gii 1985 ayaa koox ka tirsaneyd ururkii SNM socdaal shaqo u tageen wadanadaa Kenya iyo Tanzaniya. Markii ay marayeen wadanka Kenya ayaa waxaa ka war helay Maxamed Nuur Jaamac oo xilligaa Ilaahay gacanta u galiyey deeq lacageed iyo tiro ah hantida maguuraanka. Wuxuu markiiba u holadey qaabilida kooxdaa, isagoo ugu deeqay

inay hawlahooda ku fushan karaan guri ka mid ah guryihiisii ka dib markuu furihii gurigaba gacanta ka saarey. Waxaa ka mid ahaa wafdigaa aqoonyahanka qalinka iyo qorigaba ku dirirayey mujaahid Maxamed Shiikh Ibraahim Xujaale. In ka badan dhawr jeer ayaa socdaal sidan oo kale ah ay xubno ka socdo ururkii SNM ku tageen dalkaa Kenya,waxaana ka mid ahaa ragga helay fursada ka mid noqoshada wafdiyadaa abwaan Maxamed IbraahinHadraawi, Xasan Guure, Abiib Timo Cadde, Korneyl Aadan Cadde, iyo rag kale oo badan.

Maxamed Shiikh Ibraahim Xujaale oo ka waramaya kulankaa 1985kii oo ahaa kii ugu horeeyey ee kula kumay mujaahid Maxamed Jaamac Nuur ayaa yidhi; "Waxaa la yaab laheyd isagoon aqoon hore noo laheyn laakiin u dhuundaloolay hawlahaan u socono inuu noola dhaqmay noona soo dhaweeyey sidii dad waligoodba is yaqaanay.Waxaana xusid mudan in aan xilligaa wadey qorista buuggii "All in the Family" oo aan fursad fiican u helay qorista buugga markii uu noogu deeqay guri ka mid ah guryihiisa".

Maxamed Sh. Ibraahin Xujaale oo ka waramayaa siduu u tilmaami lahaana wuxuu yidhi: "Waa nin gacan furan oo deeqsi ah, oo dulqaad badan, Ilaahay ku manaystay karti iyo raganimo dheeraad ah, waxaanu ka mid yahay dadka dhibta badani ka soo gaadhi jirtay taakulaynta kooxaha SNM ee dalkaa Kenya imanaya .Waxaa ayaan daro weyn ah in dadkii waxtarkaa uu Maxamed Jaamac Nuur "Blaki" u gaysanayey xubnaha SNM ay ka soo horjeedeen maamulkii Siyaad Barre .Waxaanay adeegsan jireen rag uu ka mid ahaa Xuseen Cali Ducaale "Cawil" oo geed dheer iyo geed gaabanba u koray siduu hagardaamo ula beegsan lahaa xubnaha SNM ee halkaa ku sugan iyo dadka reer Kenya ee taageerayey halgankaa umadeed ay kana mid ahaayeen Mujaahid Maxamed "Blaki" iyo Mujaahid Idiris Xaaji Cismaan.

Xuseen Cali Ducaale "Cawil" waa wasiirka maaliyada ee xukuumada Somaliland iminka. Taariikhdu ma duugawdo ,daryeelna looma waayo, Xuseen Cali Ducaale "Cawil" waxaa aad loogu baadisoocaa inuu yahay nin waligiiba mansab ku doona cay,hagardaamo, iyo aflagaado uu la doono dad kale, isagoo guuldaro badan kala kulmay inuu aqoon iyo karti uu ku helo mansab sharafeed.

Ibraahin Cabdi Suufi oo shaqaale sare ka ahaa safaaradii Soomaaliya ee Nayroobi ayaa tilmaamey in Maxamed Jaamac "Blacki" aad loola socday dhaqdhaqaaqiisa iyo taageerada hagar la'aaneed ee uu u fidinayey ururkii SNM. Waxaanu ka waramey in uu dhawr jeer la kulmay lana wadaagey warbixino lagu hadalhayey hawlgaladiisa oo keenay inuu u diyaargaroobo falcelinta uu Maxamed Jaamac "Blaki la iman lahaa. Waxaa kaluu Ibraahin ka waramey inuu Maxamed Jaamac "Blaki" ahaa nin dhiiran aan ka gabana falalka taageerada ee uu la dhinac taagnaa ururkii SNM.

Haddaba iyadoo safaaradii Soomaaliya xilligaa aad u awood badneyd waxaa la is waydiin karaa siduu had iyo jeer uga badbaadi jiray hagardaamadan loo soo qoofilay.Waxaa Ibraahin oo hadalkiisa sii wataa uu yidhi: " Maxamed Jaamac wuxuu ku dhashay dalka Kenya, shaqaalaha sarsare ee xukuumadii kenyana waxay ahaayeen isku dugsi, ama waxay ahaayeen taageerayaashiisii mudnaa markii uu tartanada ku jiray , markaa sinaba way u suurtoobi wayday in la fulin karo qorshihii xukuumadii Siyaad Barre la doonaysay Maxamed Jaamac, waanay ku guuldareysteen ragga uu ka mid ahaa Xuseen Cali Ducaale "Cawil" hagardaameynta Maxamed Jaamac".

Mujaahid Maxamed Jaamac “Blaki “ oo ka waramaya dhakhtarad Kiiniyaan oo uu gayn jiray dhaawac iyo siduu ay u qaabili jirtay wuxuu yidhi : “ Gabadhan Dhakhtarada ah ee Keeniyatiga ah waxaanu siinay titleka Mujaahid oo ay aad u jeclayd marka loogu yeedho, weyn na ogsooneeyd inaanu halgan ku jirno, waanay nagu taageeraysay si badheedh ah in ay dhaawaca noo daweeyso, ilaa maantana xidhiidh baanu leenahay”.

## TAARIIKHDII MUJAAHIDKA EE HALGANKA

Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” halkaasuu ku noqday halyey degaal yahan ah oo aan ka qancin wuxuu u degaal galo taasoo runtii markii uu ka fadhiistay tartankii baabuurta 1981kii, uu degaalkiisii markan ku bilaabay sidii uu ula degaalami lahaa keligii teliyahii Siyaad Barre oo uu maqlay in dadkii uu asal ahaan ka soo jeeday uu ku dilayo dhalasho ahaan meesha ay ka soo jeedeen.

Haddaba waxaa isku beegmay sannadkii uu Mujaahid Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” ka fadhiistay tartankii baabuurta iyo sannadkii lagu dhawaaqay SNM oo ahaa 1981kii. Haddaba mar ay Mareegta Farshaxan weydiisay mujaahid Mujaahid Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” halka uu joogay maalintii lagu dhowaaqay SNM, wuxuu yidhi; " April 6deedii 1981kii oo ahayd maalintii lagu dhowaaqay SNM waxaan maalintaas laftigeeda joogay London iyo weliba goobtii lagaga dhowaaqay SNM". Wuxuu Mujaahid Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” hadalkiisa ku sii daray in isaga iyo Muj Idiris Xaaji Cismaan ay iyagoo London jooga ay London ka soo ka xeeyeen Mujaahid Xasan Ciise Jaamac oo berigaas uun dhameeyay buug yar oo la odhan jiray "Been Been Sii".

Waxaan marna maanku sii daynayn samafalkii hagar la’aaneed ee Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” la garab joogay xubnaha SNM. Waxaa tilmaan gaar ah mudnaa in dhaqaale ururinta ka sokow, dhaawaca xubnihii SNM daaweyn iyo buulaynba meelaha loo gayn jiray ay Kenya ka mid aheyd. Maxamed Sh. Ibraahin Xujaale oo arintaa tusaale ka soo qaadanayana wuxuu yidhi: “1987 anigoo Nairobi u soo anbabaxaya ayaa dhaawac ahaan loo keenay Xasan Ibraahin, dadka waxqabadka lahaa ee halkaa joogay waxaa ka mid ahaa Mujaahid Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” oo markiiba si raganimo leh noo qaabiley …wuxuu Xasan Ibraahin geeyey dhakhtarkii isagoo isticmaalayey hantidiisa gaarka ah ee uu xoogsadey iyo xidhiidhkii uu la lahaa shaqaalihii dhakhtarada,waxaanu u badheedhay dhibta kaga imanaysey safaaradii Soomaalidu ku laheyd Nairobi ”.

Haddaba Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” isaga iyo Idiris Xaaji Cismaan waxay ka mid ahaayeen udub dhexaadka SNM una fuliyey hawlo aad u faro badan sida;

1. In ay dhaqaalaha ay mar walba door weyn ka ciyaari jireen. Waxaynu ognahay laf dhabarta dhaqaalaha ee SNM waxaa ugu weynaa qurbaha gaar ahaan waddamada Carabta oo Sucuudigu hogaaminayo iyo waddamada bariga Afrika oo ay Kenya

hogaaminayso, taasoo ay labadan mujaahid ee Maxamed Jaamac Nuur "Blaki" iyo Idiris Xaaji Cismaan ahaayeen laf dhabartii Bariga Afrika lacagta ka soo ururinaysay bixinayayna dhaqaalaha ugu badan.

2. Abaabulkii shirarkii SNM.

3. Aabaabulkii, taakuleyntii dhaawicii SNM oo bishiiba ilaa 5 qof oo dhaawaca ayaa loo diri jiray. Waxaa kaloo sheegid mudan in weliba dadka kale ee waddanka ka soo baxsan jiray ay u sii talaabin jireen Itoobiya. Dadkii la joogi jiray qaarkood waxaa ka mid ahaa Abwaanka weyn Ibraahim Maxamed Warsame "Hadraawi" oo isagu buugiisa Halkaraan uu Blaki ka mid yahay dadka uu ugu mahadnaqayo. Waxaa kale oo ka mid ahaa Qoraaga Maxamed Xujaale oo isaga ay ka gacan qabteen buuggiisii ugu horeeyay. Abiib Tima-Cadde ayaa ka mid ahaa dadkii soo maray ee mudada la joogay Kenya.

4. Wafdiyada SNM oo iyaga qudhooda ay taakuleyn oo qaban qaabo siin jireen. Iyagoo albaab walba u garaaci jiray oo xagga diblomaasiyada gacan weyn ka geysan jiray.

5. Waxay ka qayb geli jireen shirarkii SNM ee Itoobiya lagu qaban jiray.

6. Dawldii Siyaad Barre oo safaaradeedii haysata ayey iyagu haddana mar walba ka taageerayaal badnaayeen marka ay noqoto dawlada Kenya iyagoo adeegsanaya saaxiibadooda ku jiray dawladii Kenya ee ay iskuulada wadda dhigan jireen ama aqoonta gaar ahaaneed isku lahaayeen.

## Dhibaatooyinkii La soo dersi Jiray :

Mar walba Maxamed Jaamac Nuur "Blaki" iyo mujaahidka kale ee caanka ah ee Idiris Xaaji Cismaan waxaa la soo dersi jiray dhibaato ay ku haysay safaaradii Siyaad Barre oo adeegsanaysa lacag aad u tiro badan. Xilliyo badan baa laysku dayey in la dilo. Xilliyo kale waxaa carqalad laga geliyey baayac mushterigii ay lahaayeen gaar ahaan Mujaahid Idiris oo isagu dhoofin jiray Lo'da. Mujaahid Idiris oo isagu ahaa nin yaraantiisii yimid Kenya dedaal badan ka dibna noqday maal qabeen Lo'da dhoofiyo, ayaa xataa mar laysku deyay in laga mastaafuriyo waddanka Kenya. Mujaahidiintaasi Blaki iyo Idiris waxay ku muteysteen dhibkaasi waa iyagoo aad iyo aad u taageeray SNM halgankeedii bartankana kaga jiray halganka.

Halyeyadaa kala ah Mujaahid Maxamed Jaamac Nuur Blaki iyo Idiris Xaaji Cismaan waxay baal dahab ah kaga jiraan oo ku suntan yihiin halgankii ay SNM dib ugu xoreysay dadka reer Somaliland.

Jamaal Cali Xuseen oo ah aqoonyahan reer Somaliland ah oo ka shaqeeynayay waddankaasi Kenya muddo 3 sanadood ah ayna Maxamed Nuur Jaamac "Blaki" saaxiib noqdeen iyagoo arrimaha Somaliland ka sii wadda shaqeeyey weliba ayaa yidhi; "Waxaan xasuustaa in maallin sheeda layga tusay guri ku yaallay magaalada Nairobi oo lay sheegay in mujaahid Maxamed Nuur Jaamac "Blaki" uu u iibiyey gurigaasi halgankii SNM.Nimanka waddan aanay ku korin ugu degaalamay dhalasho ahaan oo wax walba ku seegay waxay inaga mudan yihiin sharaf iyo garasho. Maanta waa inay ka mudnaadaan

cid walba in iyaga loogu horeeysiiyo in lagu sunto baal dahab ah oo taariikhda SNM gala. Mujaahid Blaki iyo Mujaahid Idiris waxay dhif iyo naadir ku yihiin ummadeena, jiilka danbe ee dibadaha ku koray inay wax ka bartaan ayeey u baahan yihiin taariikhdooda. Ilaahay ha guuleeyo way guuleeyeen Somalilandee. Nimanka kale ee Somaliland aad ugu dagaalamay waxaa ka mid ah Ambassador Maxamed Cabdi Cali oo dawlada Kenya u fadhiyi jiray waddamada Saudi Areebiya iyo Egypt oo dhalasho ahaan ka soo jeeday Somaliland iyo shakhsiyaad aad u tiro badan oo ah dadkeenii ardul Sawaahil ku noolaa".

Mujaahi. Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” wuxuu markii ugu horeeysay tegay Somaliland bilawgii 2006-dii halkaasoo si laxaad leh loogu soo dhaweeyay. Markuu aad uga yaabay soo dhoweeyntii xad-dhaafka, iyo sida wadankii dib loogu dhisay, waxaanu yidhi; “ Ilaahay baa mahad leh kol haddii wadankii oo nabad aan dib ugu soo noqday, wixii aan u soo degaalamayna si fiican baan uga seexday. Farxadii iigu badneyd noloshaydana way ahayd markaa aan cagaha saarey wadankii aan guusha la doonayey , naf iyo maalbana aan u huray liibaantiisa. “

Mujaahid Maxamed Jaamac Nuur “Blaki” wuxuu  degan yahay magaaladiisii Nayroobi ee dalka Kenya.Waxaan hawada u marinaynaa in Ilaahay ugu deeqo nolol wanaagsan, caafimaad qab, bashbash iyo barwaaqo.Waana u guul inuu Ilaahay ku simay  aragtida midhihii halgankii uu si hagar la’aaneed uga qayb qaatey.
Dhamaad

Mahadnaq:
Qoraalkan waxaa qayb weyn ka qaatey Mujaahid Maxamed Jaamac Nuur oo si qalbi furan ah u soo dhaweeyey waydiimahayagii.Waxaa kaloo mudan in la sheego Jamaal Cali Xuseen oo qayb libaax ka qaatey  soo bixitaanka qoraalka.Waxaan marna lama ilaawaan aheyd sidii wanaagsaneyd ee uu Cabdirashiid oo ah mujaahidka walaalkii noogala qayb qaatey soo bixitaanka qoraalkan.Waxaa kaloo mahadnaq mudan dhamaan dadkii waxtar ka gaystay qoraalkan.

Qalinkii  :
Fu,aad Sh. Abuubaker
Bahda Mareegta Farshaxan
http://www.farshaxan.com